# Doorashada fasalka ardayga loogu sii diyaariyo iskoolka
# Val till förskoleklass – somaliska

## Ma khasab baa in lix jirrada oo dhan iskool dhigtaan?
Haa. In iskoolku waajib noqdo waxay ka bilaabataa xillidugsiyeedka dayrta ee sannadka ilmuhu buuxsho lix sano. Taasi waxay la micne tahay in fasalka ilmaha loogu sii diyaariyo iskoolka uu waajib yahay.

## Ma khasab baa inaan doorto iskoolka ilmahaygu dhiganayo?
Ilmaha ka diiwaangashan Göteborg(Yoteboori) oo dhan waxay dammaanadqaad u haystaan inay boos ka helaan mid ka mid ah fasallada ilmaha loogu sii diyaariyo iskoolka. Laakiin xorriyada doorashada iskoolka baa waxay keenasaa in adiga waalidka ah aad soo gudbisan kartid saddex iskool oo aad jeceshahay inay ilmahaagu dhigtaan. Haddii aadan wax codsi ah soo gudbin waxaa ilmahaaga boos laga siinayaa iskool guriga u dhow(labo kilomitir u jira cinwaanka ilmuhu ka diiwaangashan yahay).

Markii aad dooratid fasalka ilmaha loogu sii diyaariyo iskoolka waxaad sidoo kale dooranasaa iskoolka hoose dhexe ee aad rabtid ilmahaagu inuu sii wato markuu bilaabaan fasalka 1aad, maadaama ilmahaagu uga hormarayo booska ilmaha kale.

## Sidee baan ku codsanayaa?
Waxaad ku codsan kartaa adigoo u maraya adeegga elektorooniga ah ama foom ku jira www.goteborg.se/valjaskola. Taasi waxay qusaysaa oo keliya codsiga iskoollada degmada. Haddii aad rabtid in ilmahaagu dhigto iskool madaxbanaan waxaad toos ula xiriirasaa iskoolkaas. Iskoollada madaxa bannaan waxay leeyihiin qaabab u gooni ah oo loo codsado.

## Goormay khasab tahay inaan codsado?
Waxaad soo dirasaa codsiga inta u dhexaysa 15 nofembar iyo 15 jeenawari. Waxaa muhiim ah inaad soo buuxisid dhammaan xogta ay khasabka tahay in lasoo buuxsho. Xasuusnow inaad hubisid in xogtoo dhan sax tahay inta aadan soo dirin codsiga.

## Goormaan oggaanayaa iskoolka ilmahaygu booska ka helay?
Inta lagu gudo jiro asbuuca 9aad waxay maamulka iskoolku soo dirayaan dhammaan jawaabihii iskoollada qaatay/oggolaaday. Markaas baa warqad lagugu soo oggaysiinayaa iskoolka ilmahaagu booska ka helay. Markii aad jawaabta iskoolka qaatay heshid waxaa muhiim ah inaad kusoo wargelisid maamulka iskoolka hoose dhexe in ilmahaagu aw dhigan doono iskoolka aw booska ka helay. Waa inaad sidoo kale ku wargelisid maamulka iskoolka hoose dhexe haddii ilmahaagu taa beddelkeeda uu boos ka helay oo uu waajibkii iskoolka uga soo baxayo iskool madaxbanaan ama iskool degmo kale ku yaal.

## Yaan u tagayaa si aan caawinaad u helo?

Waxaad la xiriiri kartaa xafiiska muwaadiniinta caawiya ( Medborgarkontoret) ee ku yaal xaafaddaada ama wac maamulka iskoolka hoose dhexe 031-365 09 60 ama email u dir grundskola@grundskola.goteborg.se.